

Maxay yihiin adeegyada sannad dugsiyeedka fidsani (ESY)?

Adeegyada ESY waa waxbarasho gaara iyo adeegyada la xiriira oo la siiyo arday u-qalma oo ku jira Qorshaha Waxbarashada Qof Ahaaneed (IEP) muddada dugsiyada cidhan yihiin. Adeegyada ESY waa ka duwan yihiin ardayga qorshahiisa IEP taas oo loo habeeyey in ardayga laga gargaaro SUGIDA xirfado muddo cayiman. Adeegyada ESY waxa loo habeeyey inay ka gargaarto ardayga siduu u smayn lahaa horumar. Adeegyada gaarka ah ee ESY ee la siinaya waxa qeexa kooxda IEP oo lagu bixiyo oo aan wax lacag ah ku joogin waalidiinta

Siduu arday ugu qalmi karaa ESY?

Hoos-u-dhac/Soo-noqosho—Tan macnaheedu waa dicitaan ku yimaada ardayga xirfada waxqabadkiisa ama aqoontiisa. Hoos-u-dhaca waa inuu la xiriirsanaado himilada IEP oo waa inaanay ka badan muddadu inta dugsiya laga fadhiyo si uu dib ugu helo xirfadii ama aqoontii. Wakhtiga la soo noqoshada xirfada ama aqoonta ayaa loo yaqaan la soo-noqosho.

Isku-filnaansho—Ardaygu kuma gaadhayo heerka isku-filnaanshaha ee la filanyo ha lama ka badan himilooyinka kala go'a adeegyada awgeed. Xirfadaha qaar ee ay daboosho isku-filnaansuhu waxa ku jira musqul-aadista, cunista, dabeecada, korriinka xiriir deggan (sida xirfadaha bulsho/xiriir), iyo garashada aqoon shaqaynaysa.

Baahiyo Gaara—Kooxda IEP ayaa sheegta inuu ardaygu qabo baahiyo gaar ah oo ka dhigaya adeegyada ESY daruuri si ay u heli karaan waxbarasho dadweyne, habboon oo lacag la'aan ah.

Sidee ayey kooxda IEP ku gaadhaan go'aanka?

Xogta macluumaadka waa in la ururiyo muddo fidsan sida fasaxyada jiilaalka ama dayrta ama xilliyo hore si loo garto waxa ku dhaca xirfad ardayga fasaxa kahor iyo kadib. Haddii uu ardaygu lumiyo xirfad muddadaas ama dhib ula soo muddo macquula, markaas waa ina la siiyo adeega ESY.

Kooxda IEP waa in ay fiiriso saamaynta fasaxa dugsiyo ku leeyahay ardayga hamihisa isku-filnaansho iyo madaxbanaani ku salaysan nooca iyo ilaa intay gaarsiisan tahay naafonimadu, ardayga dabeecadiisa iyo dhexgalka ficiisa, iyo weliba baahiyaha iyo xirfadaha ardayga ee qeexan.

Ma waxay adeegyada ESY ku xadidan yihiin “Dugsiga Gu’ga” ee degmadu bixiso?

Adeegyada ESY ma aha “SDugsiga Gu’ga”. Himilooyinka, qadarka waqtiga waxbarashada, meesh iwm dhammaan waxa qeexa kooxda IEP oo ku saleeya QOF AHAAN hadba siday ardayga baahidiisu tahay. Tusaale, adeegyada waxa lagu bixin karaa guriga gudihisa oo mudada fasaxa la qaban karaa, oo aan ku xadidnayn afar ama lixda toddobaad ee “Dugsiga Gu’ga”. Adeegyadu ma aha inay ku salaysnaadaan cidla la heli karo mudada fasaxa oo ku xadidan arrimaha waxbarashada laakiin waa in ay ku jiraan dhammaan arrimaha adeegyada ay kooxdu garatay in ay daruuri yihiin sugista heerka xirfada ee ardayga.

Goorma ayey kooxdu qeexaysaa haddii uu ilmuhu u-qalmo adeegyada ESY?

Qeexitaanka ESY waa in la sameeyaa hore ilaa bilowga sannad dugsiyeedka sida haboon. Haddii ay kooxdu qeexi kari weydo arrintan fadhiga IEP waa in lagu sheego IEP in ESY la qeexi doono sannadka dabayaaqadiisa. Kooxdu waa in aanay odhan “Maya” adeegyada ESY iyada oo la soo saarin xogta macluumaadka iyo/ama laga wada-hadal dhammaan arrimaha kooda oo dhan. Ugu danbaynta, ESY waa in laga wada-hadlo bilowga Maarso ee sannad dugsiyeeda fasaxa gu’ga ee soo socda.

ESY ma waxay keliya dhacdaa tahay fasaxa gu’ga?

Maya. Qodobada oo dhan waxa lagu dabiqi karaa fasax kasta oo waxbarasho.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.